



Waa maxay SafeArrival?

SafeArrival waa nidaam cusub oo loogu talagalay maareynta maqnaanshiyaha ardayda. Qoysasku maqnaanshiyaha hore ayaa ay usoo sheegi karaan iyaga oo adeegsanaya app taleefanka gacanta ah, websayt, ama layn taleefan oo bilaash ah. Ikhtiyaaradan waxa la heli karaa 24 ka saacadood maalintii, 7 da maalmood ee toddobaadkii.

Waa maxay sababta aanu u adeegsanayno SafeArrival?

- Waxa uu xoojiyaa ammaanka ardayga.
- Waxa uu ka caawiyaa qoysaska inay si fudud usoo sheegaan maqnaanshiyaha ardayda.
- Waxa uu ka caawiyaa dugsiyada inay si dhakhso ah jawaab uga bixiyaan maqnaanshiyaha ardayda ee aan la sharxin.
- Waxa uu dedejiyaa ogaysiisyada la siinayo qoysaska.

Sidee loo adeegsadaa SafeArrival?

Waxaa jira saddex qaab oo aad kusoo sheegi karto maqnaanshiyaha ardayga:

Muhiim: Waxa aad adeegsataa cinwaanka iimeylka ee dugsiga ardaygaagu kaa hayo marka aad akown ka sameysanayso app ka/websaytka.

- 1) App:** Ku soo dejiso app ka SchoolMessenger taleefankaaga gacanta ama waxa aad ka gashaa app ka OCDSB. Fur app ka kadibna dooro *Sign Up* (*Isdiiwaangali*) si aad isku diiwaangeliso. Kadib marka aad isdiiwaangeliso, waxa aad *Attendance* (*Xaadrista*) ka doorataa menu ga, kadibna kasii dooro *Report an Absence* (*Soo gudbi maqnnshiyo*) oo raac tilmaamaha.
- 2) Websaytka:** Waxa aad booqataa go.schoolmessenger.ca. Waxa aad doorataa *Sign Up* si aad u samaysato akownkaaga. Marka aad isdiiwaangeliso, waxa aad *Attendance* ka doorataa menu ga, kadibna kasii dooro *Report an Absence* oo raac tilmaamaha.
- 3) Taleefanka Bilaashka ah:** Waxa aad wacdaa taleefanka bilaashka ah ee 1-833-202-1417 si aad usoo sheegto maqnaanshiyo adiga oo adeegsanaya nidaam taleefan oo otomaatig ah kadibna raac tilmaamaha.



Macluumaad Faa'iido Leh:

- Haddii ardaygu uu habsaamayo, waxa aad doorataa Full Day kadibna kasii dooro Late. Dhammaan ardayda habsaamaysa waxa lagu calaamadiyaa maqnaanshiyo maalinta oo dhan ah illaa ay yimaaddaan oo ay saxeexaan iyaga oo soo maraya xafiiska dugsiga.
- Maqaanshiyaha isla-maalinta ee dugsiyada hoose iyo kuwa dhexe waxa keliya lasoo sheegi karaa marka 30 daqiqo kasoo wareegto wakhtiga bilawga dugsiga. Wakhtigaas kadib fadlan si toos ah u wac dugsiga.
- Maqnaanshiyaha isla-maalinta ah ee dugsiyada sare waxa lasoo sheegi karaa marka la gaadho 10:30 galabnimo.
- Sheegitaanka maqnaanshiyaha waa lasii qaddimi karaa maalin dugsiyeed kasta oo ku jirta kaalendarka dugsiga.
- Haddii ardayga lagu calaamadiyo maqnaanshiyo isla markaana maqnaanshiyaha aan hore loo sii sheegin, nidaamkayaga SchoolMessenger waxa uu isku deyi doonaa in uu kula soo xidhiidho marar badan illaa aad xaqijiso isla markaana aad sharraxdo maqnaanshiyaha. Haddii cid cayiman la heli waayo, shaqaalaha dugsiga ayaa dabagal ku sameyn doona. Si aad ogaysiisyadan uga hortagto, fadlan soo qaddin sheegitaanka maqnaanshiyaha ilmahaaga.
- Fadlan xaqiji in dugsigaagu markasta haysto xogtaada hadda ee xiriirka si fariimaha loogu diro waalidka/masuulka saxda ah.